

Halkan waxa ah sida loo ciyaaro goolofka dhiskiga

1. Yoolka goolofka dhiskigu waa in laga soo tuuro dhiskiga halka loo calaamadiyey tuuryada oo lagu rido saladda birta ah tirada ugu yar oo suuragal ah oo tuuryooyin ah.
2. Waxa aad kasii ambaqaadaysaa tuuryada xigta halkii ay hore ugu dhacday. Ciyaaryahanka uga fogaansho badan saladda ayaa leh tuuryada xigta.
3. Bartilmaameedku waxa uu xidhmayaa marka dhiskigu uu galo saladda.
4. Guulaystuhu waa ciyaaryahanka tirada ugu yar ee tuuryooyin ah tuura kadib marka uu ciyaaro dhammaan bartilmaameedyada.

Ha ka baqan inaad su'aal soo jeediso! Haddii aanad hubin waxba, waxa aad weydiisaa ciyaaryahannada kale ee ku sugan goobta ciyaarta.

Qalabka

Si aad u ciyaarto goolofka dhiskiga, waxa aad u baahan tahay dhiski (dhiski culus, oo si gaar ah loo qaabeeyey). Hal dhiski ayaa kugu filan oo aad ku bilaabi kartaa. Ciyaariyaha khibradda badan waxa ay soo qaataan ku dhawaad 20 dhiski, oo dhammaantood leh sifooyin duullimaad oo kala duwan.

Haddii aad dhiski hesho adiga oo ku jira ciyaarta, isku day inaad soo celiso adiga oo la xidhiidhaya mulkiilaha ama dhiskiga dhigaya goobta loogu talagalay 'dhiskiyada la helo'.

Dhaqanka iyo aadaabta marka lagu jiro ciyaarta

Goolofka dhiskigu waxa uu ku salaysan yahay mabda'a ah ciyaar caddaalad ah iyo ixtiraamidda ciyaaryahannada kale, goobta ciyaarta iyo aagga ku xeeran.

1. Ha waxyeelayn dabeecadda, waa qayb kamid ah goobta ciyaarta.
2. Qashinkaaga u qaado guriga.
3. Ha tuuryeyn haddii ay dhici karto inaad ku dhufato qof.
4. U ogolow ciyaaryahannada/kooxaha kaa xawaa-raha badani inay ku dhaafaan.
5. Codka hoos u dhig, xattaa haddii xaaladdu kugu xun tahay.

Xususnow -waxa aad qayb ka tahay khibradda qofkale!



Bartilmaameed kastaa waxa uu xidhmayaa marka dhiskigu uu galo saladda birta ah.

Mer information om discgolf

مزيد من المعلومات عن غولف القرص

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goolofka dhiskiga

More information about disc golf

اطلاعات بیشتر در مورد دیسک گلف

ተጠቃሚ ለምሳሌ ገለጻል ዲስክ ጎልፍ

Više informacija o disc golfu

Discgolf hakkında daha fazla bilgi

Mê shumë informacion rreth golfit me disqe

Mais informações sobre o disc golf

Więcej informacji na temat disc golfa

Agahdariyên zêdetir di derbarê diska golfê de

Plus d'informations sur le disque-golf

Más información sobre el disc golf

Weitere Informationen über Discgolf

اطلاعات بیشتر در مورد دیسک گلف

ข้อมูลเพิ่มเติมเกี่ยวกับดิสก์กอล์ฟ



www.svenskdiscgolf.se